MA SUGI KARNO
Sidii aan Iswiidhen uga yeeli laheeyn waddanka caalamka ugu wanaagsan ee lagu noolaado

WADAJIR AYNU U DHISNO DHUL FURSADO LAGA HELO

Waxaan dooneeynaa in dalka Iswiidhen u noqdo dhul fursado laga helo iyada oo aan loo kala aabbe-yeeleyn cidda uu ruuxu ka soo jeedo, gacanna ka geeysan karo masuuliyadda dalka, Waa fikir dalka adkeeynaya.

Maanta waxaa dalka ka taagan arrimmo kale. Qaar badan waxey la kulmaan albaabbo xiran, halka uu farqiga dabaqadaha u dhaxeeyaana sii ballaaranayo. Shaqa-la'aanta oo maraysa heer sare oo khatar ah gaar ahaan wixii dhallinyarada khuseeya. Shaqaalaha adeegga nolosha wanaagsan ee bulshada ayaa shaqada laga ceeyrinayaa. Halka ey shirkadahan ku adag tahay sidey ku heli lahaayeen shaqaale xirfad leh. Waa tuma cidda bixineeysa qiimaha ku kaca canshuuraha la dhimo?

Waa mid la dooran karo in waddo kale la qaado, si ey qaar badan u heli lahaayeen nolol ka qanisan. Waxaa shuruud ah gool cad oo la hiigsanayo iyo u tabaabusheeysi. Fursado dheeraad ah ee waxbarasho, hooyo deegaan oo dheeraad ah oo la dhiso, taageero loo fidiyo shirkadaha shaqaaleeya dhallinyaro, waddooyin badan ee isgaarsiinta xaddidka. Goobaha hoowleed ee faraha badan waxey u wanaagsan yihiin dhaqaalaha. Markaa ayaa la shaqaaleeyn karaa dad dheeraad ah, korna loo qaadi karaa tayada iskuulaadka iyo daryeelka caafimaadka-islamarkaana la yareeyo farqiga u dhaxeeya dabaqadaha ee kor u sii kacaya. Sidaa ayey ku abuurmaan goobo shaqo, dhaqaaaluhuna ku kobcaa. Waxaa ka caqli wanaagsan in dhibaatooyinka gacan leeyska siiyo sidii loo xallin lahaa ee aan leeysaga hor imaan dhallinyaro iyo waayeel, bukaan iyo caafimaad-qab, rag iyo dumar iyo sidoo kale shaqa-laaweyaal iyo kuwa shaqeeya. Iswiidhen waxay dani ugu jirtaa farqiga dabaqadaha oo yaraada iyo sinnaanta oo kor u kacda.

Maalinta 19-ka sebteembar adiga ayaa ikhiyaar leh. Dalka Iswiidhen ma wuxuu noqon doonaa dal shaqo, mid bulshada oo dhan ku heeysato hab-nololeed wanaagsan iyo mustaqbal rajo - mise waxaannu doorannaa afar sano oo kale iyo dabqadaha oo farqigoodu sii kordho? Waxaan ku niyad wanaagsannahay in Iswiidhen ku sii xoogaysaneeyso kolka ey goobaha shaqadu kor u sii kacaan islamarkaana cid walba gaari karto hamigeeda.

Maxaad ka qabtaa?

Mona Sahlin

MA SUGI KARNO IN AYNU QAADNO MASUULIYADDA ISWIIDHEN

Dalkan Iswiidhen ma wuxuu qaatay dhabbo qaldan? Dalkani ka ma soo bixi karo hoowlaha hortaagan ee mustaqbalka mar haddii shaqa la'aanta dhallinyaradu ka mid tahay kuwa ugu sarreeya waddammada Yurub. Waa siyaasad masuuliyad-darro ee la xiriirta dhaqaalaha. Sannadkii 2006 waxaan dalka uga tagnay dhaqaale dheeriya ee 70 miyaard oo koron miisaaniyadda dawladda. Dawladda ayaa muddo dhowr sannadood ah u rogtay miisaaniyad busaaradeeysan.

Canshuuraha ayaa lagu dhimay lacag la soo deeynsaday, loogana dhimay badankood dadyoowga qaata mushaarooyinka ugu badan. Waxaa iyaduna aan waxba laga qaban sidii gacan looga geysan lahaa abuurka goobo shaqo, waxbarasho iyo habka nolol-wanaagga. Waa kala doorasho ay ka timid dhibaato ka muuqata shaqa-la'aantii oo kor u kacday, macallimiin aan ku fileeyn iskuulaadka iyo wakhtiga goobaha bukaanku isbitaaladda ku sugo oo kor u sii kacay.

Waxaan horay dalkan uga saarnay xaalad dhaqaale oo cakiran. Waxaannu ogsoonnahay in siyaasad dhaqaale ee masuuliyad ku dheehan tahay ey waxbadan ka tareeyso xaaladda shaqada-la'aanta. Waa shaqada midda kordhisa tayada dhaqaalaha Iswiidhen. Sidaa daraadeed waxaan dooneeynaa in aan canshuuraha ka dhinno shirkadaha yar-yar iyo inaan maal-gelino waxsoosaarka cusub, cilmi-baarista iyo horumarka.

Iyo sidoo kale, in aan miisaaniyad gelino waxbarashada middaasina oo shaqo abuurta, guud ahaan waxaan soo jeedinay 100 000 oo goobo shaqo, goobo tababar shaqo iyo goobo waxbarasho. Waxaan ogsoonnahay in haddii dadka la siiyo fursado ay shaqaduna kordheeyso. Markaa waxaan miisaaniyad gelin karnaa tayada iskuulaadka, caafimaadka iyo daryeelka. Masuuliyad la iska saaro siyaasadda dhaqaaluhu waxay dhiiri-gelineeysaa kobcidda dhaqaalaha waxay danna u tahay hab-nololeed wanaagsan iyo cadaaladda.

- Daryeelka masuuliyadda dhaqaalaha.
- Shaqada oo loogu hormariyo.
- Iskuulka, caafimaadka iyo daryeelka oo laga hormariyo dhimista canshuuraha.

SHAQADA OO LOO KORDHIYO DHALLINYARADA

Heerka shaqa-la'aanta dhalllinyarada Iswiidhen ayaa ka mid ah kuwa ugu sarreeya waddammada Yurub. Sidaasoo ay tahay waxaa dhallinyarada ku qasab ah iney sugaan saddex bilood sidii ey taageero tababar-shaqo iyo tacliin uga heli lahaayeen xafiiska shaqada. Mararka qaarkood waxey qaadataa muddo intaasi ka badan. Xayiraaddii hoowl-gelinta dhallinyada ayaa dhibaato adag ku noqotay.

Dawladdu waxay hoos u dhigtay meelaha dugsiyada uga diyaar ah waxbarashada dadka waaweeyn. Waxaa hoos u dhacday tirada dhallinyarada biloowda jaamicadaha. Halka looga baahnaa kordhinta goobaha waxbarasho ayey hoos u dhaceen. Waana khaasare lagu samaynayo dhaqaalaha iyo bani'aadamkaba.

Waxaannu damac-sannahay inaan safka hore gelino awoodda bilowga iyo fikirrada qaniga ah ee dhallinyarada. Sidaa daraadeed waa in dib loo soo nooleeyaa hoowlgelintii xafiisyada shaqada si aanay dadku u sugin saddex bilood oo shaqo la'aan ka hor inta aanay u qalmin tallaabooyin gaar ah oo loo qabto. Dhallinyarada u baahan tababar xirfad ama waxbarasho waa in aan lagu xirin sugitaan aan loo baahnayn. Waxaannu damacsannahay in shirkadaha hoowlgeliya dhallinyaro shaqa-la'aani asiibtay aan u jabinno, kana joojinno canshuuraha hoowlgelinta, islamarkaana maal-gelin ku sameeyno 20 000 oo goobood oo tababar shaqo iyo kuwo waxbarasho.

- In dar-dar la geliyo dadaalka dhallinyarada maalinta koowaad ee shaqo-la'aan.
- 20 000 ee goobo ee tababar xirfadeed iyo waxbarasho kuna wajahan dhallinyarada
- Baabi'inta canshuurta shirkadaha hoowlgeliya dhallinyaro shaqo la'.

KORODHKA DADKA CANSHUURAHA BIXIYA WAXAA KU YARAANAYA DADKA CEEYDH QAATA

Iswiidhen waa dal cajiib ah, waxaase jira daruur wel-wel na gelinaysa. Maanta waxaa xidideystay shaqa-la'aanta, waxaana kordhay 80% dadyoowga ka qaata dhaqaalaha ceeydha degmooyinka dalka. Qeeybta boqolkiiba hal ee bulshada ugu qanisan ayaa canshuurta laga dhimay le'egtahay afar daloolow dalool dhammaan bulshada Iswiidhen ku dhaqan canshuurta laga jaray marka laysku geeyo. Ceeymiska sanduuqa shaqa-la'aanta ayaa qaaliyoow dartii ey dad badani suurtagal u ahayn inay ka mid ahaadaan. Sidoo kale waxaa la xumeeyay ceeymiskii jirrada middaasina oo sababtay in dadyoow aad u xanuusan, kuwo qaba cudurka kaankarada ey ku soo dhaceen ceeymis la'aan.

Dadka bulshada dibadda ka jooga ayaa kor u kacay 70 000 oo ruux wixii ka dambeeyay doorashadii 2006. Kolka uu wakhtigu sii socdaba waxaa ku sii adkaanaya dadkaa siday xaaladdaa uga soo bixi lahaayeen waxna uga bedeli lahaayeen noloshooda. Sidaasoo ay tahay ayay dawladdu dhabbadaa ku si socotaa.

Annaga waa wax noo cad inaan shaqada gelino safka hore. Waxaannu rumeeysannahay in Iswiidhen ku xoogsanayso kolka dadku shaqa helaan oo ay dhabayn karaan rajadooda. Waxaa iminka loo baahan yahay goolal ku talo-gal ah. Waxaannu dooneeynaa in aannu ka dhinno cashuurta shirkadaha yar-yar 6 milyaard, aannu kordhino dhaqaalaha lagu bixiyo dhismooyinka laguna magacaabo Rot-avdrag, aannu dhisno guryo badan, dhaqaalena gelino halboowlaha dalka. Sidaa ayey dad badani shaqa ku heli karaan. Waxaannu dooneeynaa in aannu miisaaniyad gelino 100 000 ee goobo shaqo cusub, tababarro shaqo iyo tacliin.

Waxaannu dooneeynaa in aannu adkeeyno wada-jirka Iswiidhen. Wel-welka ceeymiska bukaanka in meesha laga saaro, si ey bukaanka la liita kaansarada iyo kuwa kalee qaba xannuunnada halista ah aaney ugu soo dhicin ceeymis la'aan. Islamarkaana baanashada/dayac-tiridduna noqoto mid ruuxa ku habboon. Waxaannu dooneeynaa in aannu geeyrka ka bedelno aannuna hoos u dhigno ceeymiska sanduuqa shaqa-la'aanta. Inaan cidna laga qaadin 80 koron wax dhaafsiisan ee ceeymiska sanduuqa shaqa la'aanta. Sidoo kale waxaannu kor u qaadeeynaa saqafka ceeymiska, si qaar badani u helaan difaac ka hor isaataaga iney dhaqaale lumiyaan.

- Dhimidda canshuurah shirkadaha yar-yar.
- 100 000 shaqooyin cusub, goobo tababar shaqo iyo tacliin.
- Badbaado ceeymis-jirro iyo ceeymiska shaqa-la'aan ee dadka oo idilkii.

TAYADA SARE EE NOLOSHA WANAAGSAN EE DADKA OO DHAN

Sannadkii ugu dambeeyay waxey lumiyeen iskulaadka, caafimaadka iyo goobaha daryeelku, shaqaale gaarsiisan 25 000. Waxay middaasi sababtay shaqa-la'aantii oo korodhay iyo tayadii hab-nolowanaagga oo hos u dhacday. Arday walba ee iskuul dhigta waxaa ka lumay wakhti xannaanno iyo bukaan-socodka oo ku nagaada muddo ka dheer goobaha sugidda caafimaadka. Halka ay dawladduna ka dhimeeyso canshuuraha dadyoowga qaata mushaarooyinka sar-sareeya.

Fikirkayagu waa mid ka duwan. Haddii la miisaaniyad geliyo shaqa-alaha iskuulaadka iyo xannaanada waxay dhallaanku helayaan bilow wanaagsan. Tirada ardayda fasallada oo la dhimo iyo macallimiinta oo la kordhiyo. Sidoo kale shaqaale dheeriya ee caafimaadka, dhimista safka bukaan-socodka iyo tayada oo kor loo qaado.Goobaha shaqo ee aannu abuuryeyno waxay suurtagelineyaan in dad badani ka qeeyb qaataan masuuliyadda. Middaasina waxay horseedaysaa tayo ka wanaagsan ee hab-nolowanaagga shaqooyinna abuurta. Sidaa ayaan ku heleynaa wareeg faa'iido leh iyo suurtagal in lagu noolaado nolol ka qanisan.

Dugsiyada xannaanada dhallaanka waxaa lagu xiisageliyaa ilmaha waxbarashadooda cayaar iyo isku-xirnaan. Dhallaanka ey waalidkood fasaxa korriimada ku jiraan ama shaqada aan heeysan waxaa iskuulaadka xannaanada loo ogol yahay oo keliya 15 saacadood toddobaadkii. Xadeeyntaa ayaa waalidka ku dhalineeysa iney xoog badan geliyaan sidii ey wakhtigooda isugu aad-aadin lahaayeen, dhallaan badanna uu niyad-jab la soo gudboonaado maadaama aaney noloshooda la qeeybsan karin saaxiibadood. Waxaannu damacsannahay in aannu dhallaanka oo dhan xaq u siinno 30 saacadood toddobaadkii.

Hase yeeshee hab-nololeed wanaagsan weliba wuxuu ku saabsan yahay kala doorasho. Waxaannu dooneeynaa in ruuxu isagu dalbado cidda uu u dhiibanayo daryeelkiisa caafimaad iyo dhallaanka iyo waalidiintuna doran karaan iskuulka ey doonayaan. Hase yeeshee suurtagal noqon mayso in goobaha daryeelka caafimaad ee hantida loo leeyahay kala doortaan bukaan socodka aan faa'iidada ugu jirin, ama iskuulaadku kala doortaan dhallaanka u baahan kaalmada dheeriga ah.

- Macallimiin dheeri ah iyo fasallo yar-yar ee iskuulka.
- Safaf ka yar iyo tayo ka wanaagsan ee daryeelka caafimaadka.
- 30 saacadood ee iskuulka xannaanada dhallaanka waalidiinta shaqada la' ama fasaxa korriimada ku jira.

YAREE FARQIGA DABAQYADA

Fakhriga dhallaanka ayaa kordhaya. Shaqa-la'aanta dhallinyarada ayaa heer sare gaarsiisan. Dadka hoowl-gab ah ayaa bixiya canshuur ka sarreeysa shaqaalaha. Canshuurta ra'sumaalka aan guurin ayaan caddaalad ku dhisnayn. Siyaasadda dawladdu waxay suurtagelisay in dadyoowga qaniga ah ee u dhigma boqolkiiba hal dadweynaha ey helaan dhaqaale u dhigma isku darkooda afar daloolow dalool dhammaan bulshada dalka ku dhaqan. Waxaa kordhaya farqiga dabaqadaha bulshada.

Waxaannu ogsoonnahay in sinnaan iyo isku dhowaanta dabaqaduhu yihiin guullo. Sidaa daraadeed ayey dadka hoowl-gabka ah iyo shaqa-aluhu u bixin doonaan canshuur isku mid ah. Qofka hoowl-gabka ah dhaqaalihiisu ma aha kaalmo dhaqaale ee waa mushaarooyin horay loo dhigtay. Waxaan kaloo dooneeynaa in kor loo qaado taageerada waalidka kelinimada ku sugan iyo in la abaalmariyo shirkadaha shaqo siiya dhallinyarada. Sidaa daraadeed waxaa kor loo qaadi doonaa saqafka ceeydha ama kaalmada aan joogtada ahayn ee waalidka daryeela carruur bugta.

Canshuurta ra'sumaalka aan guurin waa in cadaalad lagu saleeyo. Guryaha lagu qiimeeyo ugu yaraan 4,5 malyuun oo koron, una dhigma 1% guryaha dalka ka dhisan ayaa laga qaadi doonaa canshuur ka sarreeysa midda ey iminka bixiyaan. Halka 99% ee soo haray bixin doonaan midka ey iminka bixiyaan ama mid ka hooseeysa, marka aannu ballaarinno saqafka canshuurta dhaqaalaha.

Kolka ey qaar badan u suurtagasho iney gacan ka geeysan karaan bulshada ayaan miisaaniyad gelin karnaa wanaajinta hab-nolowanaagga. Kolka iskuulka iyo caafimaadkuna ka wanaagsanaadaan ayey dadyoow intaa sii dheer gacan ka geeysan karaan. Markaa waxaannu biloownay wareeg wanaagsan ee cid waliba dani ugu jirto.

- Baabi'i canshuurta dheeraadka ah ee dadka hoowl-gabka ah.
- Kordhi kaalmada daryeelka iyo kaalmada kirada guryaha ee waalidiinta kelinimada ku sugan.
- Kordhi saqafka ceeydha aan joogtada ahayn ee waalidka.

SOOSHIYAAL

Shaqooyin dheeraad ah
Waxaannu dooneeynaa in aannu miisaaniyad gelino 100 000 oo shaqooyin dheeraad ah, tababar shaqo iyo goobo waxbarasho. Waxaannu dooneeynaa in aannu dhinno canshuurta shaqaaleeynta shirkadaha yar-yar. Waxaannu dooneeynaa in aannu casriyeeyno guryaha, halboowlayaasha dalka iyo shaqaale dheeraad ah ee la qoro waaxda hab-nolowanaagga bulshada.

Shaqooyinka dheeraadka ah ee dhallinyarada
Firfircooni geli hoowlaha dhallinyarada aan shaqa heeysan una baahan taageero maalinta ugu horreeysa – baabi'i joojinta firfircooni gelinta 3da bilood ah ee xafiisyada shaqada! Biloow hoowl ku wajahan dhallinyarada aan shaqada heeysan oo loo sameeyo goobo 20 000 ah ee tababar shaqo iyo goobo waxbarasho.

Lacagaha hoowl-gabka iyo mushaarka
waa in si isku mid ah loo canshuuraa
Dhaqaalaha hoowl-gabku ma aha taageero lacageed, waa mushaar hore loo dhigtay. In hoowl-gabka iyo mushaarka isku si loo canshuuro. Iney dani ku jirto in la shaqeeyo ama la shaqayn jiray.

Daryeel caafimaad wanaagsan iyo iskuulka
iney ka hormaraan canshuur-dhimidda
Waxaannu dooneeynaa in aannu miisaaniyad gelino shaqooyinka hab-nolowanaagga iyo inaan kor u qaadno tayada daryeelka caafimaadka, xannaanada iyo iskuulka.

Doorasho xor ah in la siiyo bukaan-socodka
Waa in la xaqiijiyo tayada daryelka caafimaadka. Mamnuuc saf dhaafidda caafimaadka – ceeymiska gaarka loo leeyahay iyo in aan lacagta laga hormarin baahida caafimaadka. Dadka oo dhan waa in xaq loo siiyo iney dooran karaan cidda ay u dhiibanayaan daryeelkooda caafimaad hase yeeshee aanay heeyadda caafimaadku dadka kala dooran karin.

Ceeymiska xannuunku – wuxuu qeeyb ka yahay habka shaqada
Waxaannu dooneeynaa in aannu dayac-tir ku sameeyno ceeymiska xan-nuunka. Ruuxu waa inuu helaa kaalmo si uu shaqada ugu soo laabto iyo dhaqaale ammaan ah inta uu xannuunsan yahay. In la baabi'iyo xaaladda macnaheedu tahay in ruuxu inta uu xanuunsan yahay ceeymiska laga saaro.

BURJUWAASI

Farqiyada dabaqadaha oo kor u kacay
Dawladdu waxay ku ballan qaaday shaqooyin dheeraad ah – waxaa lumay 100 000 oo goobo shaqo. Dawladdu waxay ku ballan qaaday in la yareeyo dadka bulshada dibadda ka jooga – 70 000 ayey kor u kacday dadyoowga bulshada dibadda uga jooga. Waxaa istaagay dhismihii hooyga iyo maal-gelintii waxaana la dhimay tiradii goobaha waxbarashada.

Dad badan ayaa noloshooda qaangaarnimo ku bilaaba lacag ceeydh
Dhallinyarada iswiidhishka ah ee shaqada aan heeysan ayaa ka mid ah kuwa ugu tirabadan Yurub. Sidaasoo ay tahay waxey dhallinyaradaasi sug-aan ugu yaraan saddex bilood si ey ku helaan taageero tababar shaqo ama waxbarasho. Iminkadan 40% dadyoowga qaata ceeydha ayey da'doodu ka hooseeysaa 30 sannadood.

Canshuur ka sareeysa shaqaalaha ayay
bixiyaan dadka hoowlgabka ah
Dawladdu waxay bixisay war cad. Qofka hoowlgabka ah wuxuu bixin doonaa canshuur midda shaqaalaha ka sarreeysa.

Dib u dhac hab-nololeedka wanaagsan kolka
canshuurta laga dhimo dadka qaniga ah
25 000 oo shaqaale ayaa ka baxay hoowlaha adeegga hab-nololeedka wanaagsan. Dawladdu waxay hor-marisay canshuur-dhimid gaarsiisan 100 milyaard oo badankeed loo sameeyey ra'sumaaliinta.

Saf dhaafidda daryeelka caafimaad
Dawladdu waxay xeereeysay sharci u ogolaanaya in heeyadaha caafimaadku ka hoowlgalaan goobaha ey is leeyihiin macaash ayaa idiinku jira. Maaha goobaha ay baahidu ka jirto. Bukaan-socodka ceeymiyeeysan ayaa safka meel hore dhaqaale ay bixiyeen ku gala.

10 000 kun oo ruux ayaa ceeymiska laga saaray
Dawladdu waxay ku kacday fal ay ceeymiska kaga saartay 10 000 kun oo ruux iyadoona fikirkeedu yahay in xaaladdaa ay halkeeda ka sii socon doonto. Dadyoowga xannuunsan uma baahna iney lacagta ceeydha doon-taan. Sidee buu ruux xannuunsan ugu caafimaadayaa inuu fakhriyo?

DEEGAANKA – MAALGELIN ISKU SOO KHARASH CELISA

In bulshada lagu hago dhabbo lagu nagaado waa hoowl aan sahlanayn, laakiin waxaa weliba lagu helayaa hab lagu wanaajiyo deegaanka laguna kordhiyo shaqooyinka. Waxaannu dooneeynaa in dalkani hor-joog u noqdo tamarta cimilada u wanaagsan, cilmi-baarista iyo dhismaha hooy cimilo dhowr leh. Dhimista canshuurta ROT ee iminka guryaha lagu wanaajiyo waa in lagu ballaariyaa gunno dheeri ah ee guryaha aan aqallada safan (radhus), fillooyinka, guryaha gaarka loo leeyahay, guryaha iskaashatooyinka ee ku tallaabsada sidii loo hagaajin lahaa tamarta cimilada. Guryaha dabaqyada ee ku caan baxay hagaajinta cimilada waxaannu damacsannahay in aannu gnnada ROT ku taageerno.

Waa in loo sahlo bulshada iyo shirkadaha iney doortaan gaadiid cimilada u wanaagsan, sidaa daraadeed waxaa loo baahan yahay maal-gelin taariikhiya ee lagu maal-geliyo waddooyinka xadiidka ee tareemmada iyo gaadiidka bulshada. Arrimmahaasi waxey adkeeneyaan awoodda tartan ee Iswiidhen.

Canshuuraha oo si habsami leh loo isticmaalo waxay dhalinaysaa cimilada oo isbedel wax ku ool ah (laba-kacleeyn) lagu sameeyo. Waxaannu u baahannahay qalab haga si Iswiidhen dib loogu habeeyo. Sidaa daraadeed ayaan fikirro qeexan uga bixineeynaa inta ka horreeysa doorashada foodda innagu soo haysa. Waxaannu si furan oo daacad ah u leenahay in loo baahan yahay kor u qaadidda canshuurta kooldhayoksiidhka. Waxaan kaloo kor u qaadeeynaa qiimaha batroolka 49 öre afarta sannadood ee foodda innagu soo haysa. Iyadoona lagu taakuleeyn doona dhaqaale dadyoowga gaariga ugu baahan shaqadooda. Guud ahaan waxaa la sii yarayn doonaa afarta sannadood ee foodda innagu soo haya dhaqaalaha ku baxaya safarka gaariga iyadoona dib loogu soo celin doono 1,50 koron tobankii kiilomitirba.

Dawladdu ma awooddo inay sheegto inta ay kor u qaadi doonto qiimaha batroolka. Ma wuxuu noqon doonaa 70 öre, sida ey soo jeediyeen guddiyada cimilada ee xisbiyada burjuwaasigu? Mise waxey kor u qaadi doonaan 105 öre sida uu soo jeediyay xisbiga Bidixdu (Center)?

Canshuuraha gawaarida waa in loo habeeyaa sidii loogu hagi lahaa kuwo cimilada u roon. Waxaannu dooneynaa in aannu ka dhinno canshuuraha basaska 100 malyuun oo koron. Waxaannu dooneynaa in aannu sahalno oo aan ka geeysanno taageero mar keliya ah gawaarida xamuulka. Waxaan soo jeedinney taageero dib loogu dayac-tirayo gawaarida yar yar si cimilada loogu hagaajiyo.

- Ballaari dhimista ROT iyadoona lagu daro gunno-cimilo iyo in la abuuro taageerada ROT ee guryaha waaweeyn.
- Maalgelin xoogan oo taariikhi ah ee xadiidka tareemmada iyo gaadiidka bulshada.
- U sahal gawaarida xamuulka iyo kuwa yar-yarba sidii ey cimilada ugu wa naagsanaan lahaayeen.

WAXBARASHADA AYAA SHAQA ABUURTA

Dad badan oo Iswiidhen ku dhaqan ayaan heeysan shaqo ey tagaan. Islamarkaa waxaa jira shirkado doonaya shaqaale, ee aan heleeyn dad leh xirfad ku habboon. Iyadoo sidaa tahay ayay dawladdu go'aamisay inay dhinto goobaha waxbarasho ee dadka waawayn, hoowlihii waxbarashada ee suuqa shaqada, waxayna joojisa dhismihii goobaha tacliinta sare. Waa tallaabooyin xal u noqon lahaa dhibaatooyinkaa.

Aqoonta iyo waxbarashadu waxey suurtageliyaan horumar iyo xoriyadda ruuxa iyo sidoo kale kala doorasho. Dalkan Iswiidhen wuxuu u baahan yahay xoog shaqaale, bulsho aqoon iyo dabacsanaan leh. Sidaadaraadeed ayaannu u dooneeynaa in aanuu gelino miisaaniyad hoowlo ballaaran ee la xiriira goobo tabbabar-shaqo iyo waxbarasho. Kolka ay bulshada u sahlanaato inay hoowlaha bad-badalan karaan waxaa suurtagalaya in dad badani ka soo bixi karaan shuruudaha suuqa shaqada. Waxaa taas loogu baahan yahay ma aha uun si wax looga qabto shaqo la'aanta laakiin waxaa weliba lagu hubin karaa in dalka Iswiidhen uu mustaqbalka la tartamo waddamada kale.

Kolka shirkad albaabada loo xiro oo wax soo saarkii dalka dibaddiisa loo raro, waxaa muhiim ah in dadka fursad loo siiyo iney aqoontooda kororsadaan ama xirfad kale ey bartaan. Iswiidhen maaha inay tartan ku gasho mushaarooyinka hooseeya ee waa inay tartan ku gasho aqoonta. Waxaannu dooneeynaa in aannu hirgelino ceeymis-aqooneed si loo suurtageliyo la-qabsi isbedel ee suuqa shaqada

- Goobo badan ee tacliinta sare, jaamicadaha xirfadda, waxbarashada dadka waawayn iyo hoowlaha waxbarashada ee suqa shaqada.
- Bilow ceeymis-aqooneed.
- Iswiidhen ku tartami mayso mushaarooyin hooseeya ee waxay ku tar tamaysaa aqoon.

SINNAANTA OO HUBAAL AH

Horumarka ayaa gadaal-gadaal u socda. Keliya wixii ka dambeeyay 2006-dii ayaa canshuuraha laga dhimay 30% ragga in ka badan haweenka. Ceeymisyadii ammaanka oo sii xumaaday, sida ceeymiska xannuunka ayaa haween badan aad u saameeyay. Haween ka badan ragga ayaa ku shaqeeya shaqo aan buuxin, middaasina oo natiijo u noqota dhaqaale liita iyo lacag hoowl-gab oo hooseeysa. Haween badan ayaa shaqadoodii ku waayay goobaha caafimaadka iyo iskuulka halka la sugayo qaar kale iney shaq-la'aantu ku soo food leedahay iyadoo weliba la filayo in laga dhimo taageeradii dawladda. Sidaa oo ay tahay ayay dawladdu hirgelisay qorshe loogu magacdaray taageerada xannaaneeynta (vårnadsbidrag) ee wax u dhimeeysa sinnaantii dhaqaalena ka xayuubiyay iskuulka xannaanada.

Ragga iyo haweenka waa in la siiyaa awood isku mid ah sidey noloshooda ugu dhex dhisan lahaayeen bulshada. Dalkan Iswiidhen waa inuu sii wadaa hormuudnimadii caalamka marka laga hadlayo sinnaanta. Sidaa daraadeed waa in fursado isku mid ah ey u helaan ragga iyo haweenkuba hadday noqon lahayd shaqo iyo horumar shaqo.

Haween badan ayaa doonaya, hase yeeshee aan suurtagal u haysan shaqa buuxda. In la adkeeyo xaqa loo leeyahay shaqo buuxda waxay muhiimad u leedahay habka sinnaanta. Qeeybo badan ee la xiriira hoowlaha hab nolowanaagga bulshada waxey salka ku hayaan shaqaale haya shaqo aan buuxin. Heeyadaha dawladda/bulshadu waa iney hormuud u noqdaan tusmada in shaqo buuxda ay suurtagal tahay. Waxaannu dooneynaa in aannu ku miisaaniyad gelino hal milyaard sidii aan ugu dhiiri-geli lahaeyn heeyad goboleedyada iyo degmooyinka dalku sidey ku kordhin lahaayeen dadyoow heeysta shaqo buuxda.

Habka wanaagsan ee suuqa shaqadu wuxuu u baahan yahay in haweenka iyo ragguba shaqo ku hoowlan yihiin – iyadoo aan loo aabba yeelin iney yihiin dad wada deggan ama waalid kelinimo ku sugan. Markaa waxaa loo baahan yahay goobo xannaano dhallaan ee fiidadkii iyo maalmaha fasaxa la yahay. Waxaannu damacsannahay in aannu meel isugu keenno waalidnimada iyo shaqada si lagu gaarana loo kordhiyo fursadaha xannaanooyin furan xilliyada aan sida caadiga ah la shaqeeyn.

Dugsi xannaano oo tayo wanaagsan, dhallaanku ka helaan, waalidiintuna ammaan ku dareemayaan, waa aas-aaska sinnaanta bulshada. Nasiib-darro horumarka ayaa iminka u janjeera dhic qaldan Waxaa kordhaya tirada ardayda halka shaqaaluhu ka yaraado. Waxaannu dooneynaa in aannu xaqiijinno tayada dugsiga xannaanada iyada oo la miisaaniyad geliyo shaqaale dheeri ah oo qabta hoowlaha hab-nololwanaagga bulshada.

- Hal milyaard si looga abuuro shaqo buuxda degmooyinka iyo gobollada.
- Iskuul xannaano furan xilliyada aan sida caadiga la shaqayn.
- Maalgelin si loo hagaajiyo tayada iskuulka xannaanada.

GACAN KA GEEYSO

Si aad uga qaybgasho ma aha inaad tahay siyaasi ama caalin. Midda ugu muhiimsan waxay tahay inaad gacan ka geeysato, ha yaraato ama ha weeynaatee. Nala soo xiriir. Ku qeeybi materiyaal goobta aad ka shaqeeyso, badal summaddaada Facebook, qor maqaal, la hadal codbixiyeyaasha ama albaabada ku garaac.

XUBIN KA NOQO

Tobankaaga lambar noogu soo dir SMS-ka
72105 qiime 100 koron.

möjligheternasland.se